



(The Government of Federal Republic of Somalia)

Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/000265/11/2014

Taariikh: 01/11/2014

KU: Ibraahim Yaroow Isaaq (Wasiir Ku-Xigeenka Amniga Qaranka) -Baydhabo-
KU: Cabdullahi Xuseen Cali (Wasiir Ku-Xigeenka Gaashaandhigga) -Baydhabo-
KU: Taliyaha Ciidanka Qaybta 60aad ee XDS -Baydhabo-
KU: Taliyaha Ciidanka Booliska ee Gobolka Bay -Baydhabo-
OG: Guddoomiyaha Golaha Shacabka -Muqdishu-

Ujeedo: Tallaabooyin Xukuumadeed ee Hawsha Dhismaha Maamulka Koonfur Galbeed

Waxaa ii muuqday inay jiraan arrimo loo baahan yahay in laga wada tashado oo la xiriira hawsha lagu dhisayo Maamul Goboleedka Koonfur Galbeed, si hawshaasi u noqoto mid taabo gasha buuxisana mabaadiidii la isku waafaqay heshiiskii Muqdisho.

Mabaadiidaas oo ahayd:

1. In lagu dhan yahay loona wada dhan yahay dhismaha Maamul Goboleedka Koonfur Galbeed, caddaaladna loo wadaago dhismaha Maamul Goboleedkaas;
2. In xukuumaddu horseeddo goob joogna ka tahay dhammaan hawlaha lagu dhisayo maamulkaas; iyo
3. In uu jiro jawi xasillooni iyo nabad ah oo hawshaas dhismaha iyo maamulka lagu fuliyo.

Anigoo ka ambaqaadaya mabaadiidaas, waxaan go'aamiyay idin farayaana qodobbada soo socda:

- a) Inay xubnaha golaha ee u xilsaaran hoggaaminta dhismaha ee ku sugan magaalada Baydhabo wada tashi u yimaadaan magaalada caasimadda ah ee Muqdisho taariikh 02.11.2014;
- b) In laga hortago wax kasta oo carqaladaynaya amniga goobta shirka iyo guud ahaan magaalada. Arrintaasna waxaa u xilsaaran Taliyaha Qaybta 60aad ee XDS iyo Taliyaha Ciidanka Booliska ee Gobolka Bay;
- c) Inta wada tashigu socdo, shirku waa soconayaa, hase yeeshee wax tallaabo ah looma qaadi karo dhammaystirka dastuurka iyo doorasho la qabto.

Wada shaqayn wacan

Mudana Cabdiweli Sheekh Axmed Maxamed
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

